

Wax Akhrinta Ilmahaaga

Daaweynta Akhrinta ilmahaaga way awoodaa in ay afkooda kordhiso! Ku bilow sida ugu dhakhsaha badan ee aad kari karto – xitaa carruurta waxay ku raaxaystaan buugaagta!

Waa maxay Akhriska Wadahadalku?

- Ilmuhu wuxuu ka caawiyaa sheegidda sheekada.
- Qofka weyn wuu dhagaystaa, weydiyaa, wuuna taageeraa ilmaha.
- Ilmuhu wuxuu si firfircoon ugu lug leeyahay sheekada.
- Sawirada waa la sharaxay, eraybixinta waa la qeexay lana balaariyay.
- Dariiq looga dhigo akhriska wada hadal xiiso leh oo dhex mara dadka waaweyn iyo ilmaha.



HEERKA 1

Carruurta aan hadlin weli ama isticmaalaya kelmadaha keliya.

Tusaalooyinka kicinta:

- Waan arkaa...
eyga
- Eeg... waxaa jira
- Farxad, waan
jeclahay

Qof weyn/Qaangaarka: Eey waan arkaa!

Canug: (wax jawaab ah malahan)

Qof weyn/Qaangaarka: (wuxuu qaataa gacanta ilmaha oo wuxuu ku tilmaamaa eeyga) Waan helnay! Eyga waad salaaman tahay!

Canug: (dhoolacadeyn, hirar ilaa eyga, ama jawaab la'aan)

Qof weyn/Qaangaarka: nabadgalyo eey! (wuxuu aadayaa bogga xiga)

Qof weyn/Qaangaarka: Eeg, waxaa jira...

Canug: Eey!

Qof weyn/Qaangaarka: Waad saxantahay! Waa eey weyn!

Canug: Eey!



Tilmaamaha Guusha

- U adeegso calaamado ama qoraallo dheg dheg ah bog kasta si aad uga tagto xusuusinta naftaada wixii ku saabsan inaad ka faalloto ama aad weydiiso.
- Akhriso buug kasta in ka badan hal jeer iskuna day inaad ilmahaaga u sheegtid wax badan oo sheekada ah markasta ama tilmaam waxyaabo cusub.
- Iska dhaaf ereyada ku jira buugga oo ka samee sheeko adiga kuu gaar ah oo ku saleysan sawirrada.
- Faallo ka bixi (waxaan arkaa eey) halkii aad had iyo jeer su'aalo ka weydiin lahayd (waa maxay taasi?)
- Erayada ficilka tusaalaha ah (wuu ordayaa, iyadu way jiidanaysaa) iyo sharraxayaal (taasi waa weyn tahay! Ey dhakhsa badan!)
- Adeegso cod xamaasad leh iyo jimicsi xamaasad leh – ka dhig waqtigan mid adiga iyo ilmahaagaba xiiso u leh! Isticmaal codad kala duwan, oo noqo mid firfircoon.

MultiCare 
Mary Bridge
Children's

CHILDREN'S THERAPY

400 South 43rd Street
Renton, WA 98055